

JAMHUURIYADDA		SOMALILAND
FAAFINTA RASMIGA AH		
SOMALILAND REPUBLIC OFFICIAL GAZETTE	النشرة الرسمية لجمهورية صوماليلاند	
XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA JSL, HARGEYSA E-mail: Garyaqaankaquud@gmail.com		
Sanadka: 3aad	Cadadka: 4aad ee April	Taariikh: 03/05/2014
QIIMAHA CADADKA: SL. Sh.		
RUKUNKA (Subscription):		
QIIMAHA FAAFINTA AAN DAWLIGA AHAYN ee Qaybta Shanaad: Sadarkii Boggii kastaaba SL. Sh.		

TUSMADA CADADKA

<p><u>QAYBTA KOWAAD:</u> XEERARKA BAARLAMAANKA IYO XEER NIDAAMIYAYAASHA:</p> <p style="text-align: center;">1) SOOMA BIXIN</p> <p><u>QAYBTA LABAAD:</u> XEER NIDAAMIYAYAASHA IYO DIKREETOYINKA MADAXWEYNAHA:</p> <p style="text-align: center;">2) <u>XEER MADAXWEYNE Lr: 0380/042014</u> Magacaabid Garsoore</p>	115
---	-----

- | | |
|---|-----|
| 3) <u>XEER MADAXWEYNE</u> Lr: 0381/042014 | 116 |
| Cafis Madaxweyne | |
| 4) <u>XEER MADAXWEYNE</u> Lr: 0382/042014 | 117 |
| Cafis Madaxweyne | |
| 5) <u>XEER MADAXWEYNE</u> Lr: 0383/042014 | 119 |
| Magacaabid | |

QAYBTA SADEXAAD: DIGREETOYINKA,
WAREEGTOOYINKA, AMARADA & XEER

- | | |
|--|-----|
| NIDAAMIYAYAASHA | 121 |
| WASIIRADA, IWM | |
| 6) Fulin Go'aan kazoo baxay Gudiga
Cadaaladda Jsl, Wasaaradda
Cadaalada & Arrimaha Garsoorka | 124 |
| 7) Xeer Wasiir Lam:03, Wasaaradda
Beeraha | 127 |

QAYBTA AFRAAD: AMARADA &
GO'AANADA MAAMUL

- | | |
|--|-----|
| 8) Naado libin Guri, Maxkamadda
Degmada Hargeysa | 132 |
| 9) Diiwaan Gelin Shirikada Hilaac Trading
Export, <u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u> | 134 |
| 10) Diiwaan Gelin Shirikada Horn Touch
Enterprise, <u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u> | 136 |
| 11) Diiwaan Gelin Shirikada Haya Limited,
<u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u> | 139 |
| 12) Diiwaan Gelin Shirikada Muuqaal
Technology General Tradings Co,
<u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u> | 137 |
| 13) Diiwaan Gelin Shirikada Forcier
Consultancy, <u>Xafiiska Xeer Illaalinta
Guud</u> | 141 |

14) Diiwaan Gelin Shirikada Turkish Africa Trade, <u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u>	142
15) Diiwaan Gelin Shirikada Googaa Cigale Company, <u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u>	144
16) Diiwaan Gelin Shirikada Dollar Stores Company, <u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u>	146
17) Diiwaan Gelin Shirikada Madhey Limited, <u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u>	
18) Diiwaan Gelin Shirikada Gate Way Law Firm, <u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u>	
<u>QAYBTA SHANAAD: OGEYSIISYADA</u>	
19) Ogeysiis Faafinta Rasmiga ah, Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Qaranka	

QAYBTA LABAAD:

XEER NIDAAMIYAYAASHA IYO

DIKREETOYINKA MADAXWEYNAHA:

REPUBLIC OF  SOMALILAND

THE PRESIDENT


JSL/M/XERM/249-2352/042014

DATE 01/04/14

XEER MADAXWEYNE Lr:0380/042014

Magacaabid Garsoore

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



Markuu Arkay:

Qodobka 90aad ee
Dastuurka
Jamhuuriyadda
Somaliland;

Markuu Arkay:

Xeerka Dhismaha
Maxkamadda Ciidanka
Qaranka ee Lr.RSLP/D-
1.120/94;

Markuu Arkay:

Baahida loo qabo in
la buuxiyo jagada ka
bannaan
Garsoorayaasha
Madaxkamadda
Hargeysa ee
Ciidamada Derajada
Koowaad;

Markuu Tixgeliyey:

Talada iyo soo-
jeedinta
mas'uuliyiinta ay
khusayso;

Wuxuu Go'aansaday

In Nageeye X. lid Cabdi oo ka tirsan Ciidamada Asluubta uu ahaado Garsoore Maxkamadda Derajada Koowaad ee Hargeysa, isaga oo buuxin doona Xubinta uu banneeyey Marxuun Cabdilaahi Muxumad Cumar oo ahaa Guddoomiye Ku-xigeenka Darajada Koowaad ee Maxkamadda Hargeysa.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



REPUBLIC OF  SOMALILAND

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-2380/042014

DATE06/04/14

XEER MADAXWEYNE Lr:0381/042014

Cafis Madaxweyne

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad, xubintiisa
5aad ee Dastuurka
Jamhuuriyadda
Somaliland;
- Markuu Arkay: Qoraalka codsiga ah ee uu
soo qoray xildhibaan
Maxamed Cismaan
Bulqaas;
- Markuu La Tashaday: Masuuliyiinta ay arrintani
khusayso;
- Markuu Ka Fiirsaday: Qoraalka warbixinta ah ee
Hay'adda Sirdoonka
Qaranka JSL ee ay
summadiisu tahay
Hsq/Dis/058/14 kuna
taariikheysan 01/04/2014,

kuna saabsan Maxamed
Maxamuud Cali Bile;

Markuu Arkay:

Qodobka 149aad ee Xeerka
Ciqaabta Guud;



Wuxuu Go'aansaday

In laga bilaabo taariikhda maanta uu cafis gaar ahaaneed u fidiyo Maxamed Maxamuud Cali Bile, oo qaranimada Somaliland ka soo hor jeeday in muddo ah.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  SOMALILAND

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-2399/042014

DATE12/04/14

XEER MADAXWEYNE Lr:0382/042014

Cafis Madaxweyne

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay:

Qodobka 90aad, xubintiisa
5aad ee Dastuurka

Jamhuuriyadda
Somaliland;



Markuu Arkay:

Qoraalka codsiga ah ee uu
soo qoray Ismaaciil Xasan
Jaamac;

Markuu La Tashaday:

Masuuliyiinta ay arrintani
khusayso;

Markuu Ka Fiirsaday:

Qoraalka warbixinta ah ee
Hay'adda Sirdoonka
Qaranka JSL ee ay
summadiisu tahay
Hsq/Dis/061/14 kuna
taariikheysan 09/04/2014,
kuna saabsan Ismaaciil
Xasan Jaamac;

Markuu Arkay:

Qodobka 149aad ee Xeerka
Ciqaabta Guud;

Wuxuu Go'aansaday

In laga bilaabo taariikhda maanta uu cafis gaar ahaaneed u fidiyo Ismaaciil Xasan Jaamac, oo qaranimada Somaliland ka soo hor jeeday in muddo ah.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF SOMALILAND



THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-2414/042014

DATE 15/04/14

XEER MADAXWEYNE Lr:0383/042014


Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad, xubintiisa
3aad ee Dastuurka
Jamhuuriyadda
Somaliland;
- Markuu Tixgeliyey: Ahmiiyadda La-Taliyaha
Madaxweynaha ee Arrimaha
Hay'adaha Caalamiga iyo
Kuwa Maxaliga ah;
- Markuu Arkay: In baahi loo qabo
magacaabidda jagadan;
- Markuu Ka Fiirsaday: Kartidiisa, aqoontiisa iyo
hufnaantiisa shaqo;
- Markuu Ku-qancay: In uu hanan karo xilkan loo
magacaabay;

Wuxuu Go'aansaday

In Mudane, Cabdifataax Siciid Axmed Guuleed, laga bilaabo taariikhda manta uu ahaado La-Taliyaha Madaxweynaha ee Arrimaha Hay'adaha Caalamiga iyo Kuwa Maxaliga ah.



Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

QAYBTA SADDEXAAD:
DIGREETOYINKA, WAREEGTOOYINKA,
AMARADA & XEERNIDAAMIYAYAASHA
WASIIRADA, IWM



JAMHUURIYADDA SOMALILAND

REPUBLIC OF SOMALILAND

WASAARADDA CADAALADDA &

MINISTRY OF JUSTICE &

ARIMAHA GARSOORKA

JUDICIAL AFFAIRS

XAFIISKA WASIIRKA
OFFICE OF THE MINISTER



WC&AG/G-02/160/14

Date: 03/04/2014

Ku: Telefishanka Qaranka JSL =Hargeysa=

Ku: Radio Hargeysa =Hargeysa=

Ku: Guddoomiyaha Maxkamada
Racfa, Gobol, M/Jeex =Hargeysa=

Ku: Guddoomiyaha Maxkamada Gobolka M/Jeex
=Hargeysa=

Og: Guddoomiyaha Maxkamada Sare JSL
=Hargeysa=

Og: Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL
=Hargeysa=

Og: Garyaqaanka Guud ee Dawladda =Hargeysa=

**UJ: FULIN GO'AAN KA SOO BAXAY GUDIGA
CADAALADDA JSL**

Ku: Radio Hargeysa, =Hargeysa=

Ku: Telefishanka Qaranka JSL,

Wasaaradda Cadaaladda ee JSL, iyadoo cuskanaysa Qodobka 106aad ee Dastuurka Qaranka Farqadiisa 1aad, kaasoo qeexaya inay Wasaaradda Cadaaladdu u xilsaaran tahay Fulinta Go'aanada Caadaaladda.

Sidaa darteed, waxaanu Halkan ku faafinaynaa
Go'aanka Lanbarkiiisu yahay MS/GG/G-
03/02/2014 ee 13/04/2014



WAXAY GO'AAMIYEEN

QOD.1AAD

Shaqo ka saarid Garsoorayaal

1. Waxa shaqadii laga Saaray Garsoorayaashan hoos ku qoran:

- ❖ Axmed Muuse X.Maxamed Siraad, oo ahaa Garsoore Maxkamadda Rafcaanka Gobolka M/Jeex Hargeysa.
- ❖ Aadan Macalin Xirsi, oo ahaa Garsoore Maxkamadda Rafcaanka Gobolka M/Jeex Hargeysa.

QOD.2AAD

Magacaabid Ku Xigeeno Xeer ilaaliye Guud


Waxaa la magacaabay Ku Xigeenada Xeer Ilaalayahaba Guud ee Magacayadoodu hoos ku qoran yihiin:

1. C/raxmaan Maxamed Maxamuud
2. Yassmiin Cumaer X.Maxamuud
3. C/fataax Yuusuf Cabdi
4. C/Ilaah Cali Yuusuf
5. Maxamed Ibraahim Cali
6. Nimco Daahir Carab
7. Hibo Axmed Magan
8. Xuseen Cali Khayre
9. Maxamed Jaamac Ibraahim

Qod.3aad

Bedel Garsoore.

1. Garsoore Mubaarik Cismaan Aw Cali, waxaa laga soo bedelay Guddoomiyaha Maxkamadda Degamada Sabawanaag, waxaan loo soo bedelay Garsoore Maxkamadda Gobolka Maroodi-Jeex Hargeysa



ALLAA MAHAD LEH

Xuseen Axmed Caydiid

WASIIRKA CADAALADA IYO ARR.GARSOORKA



Jamhuuriyadda Somaliland

Republic of Somaliland

Wasaaradda Beeraha

Ministry of Agriculture

Wasiirka Beeraha

Ref: WB/WX/Agri/F-191157/2014

Taariikh: 15/04/2014

Xeer Wasiirka Wasaaradda Beeraha JSL

Wasiir Lam:03



Wasiirku,

Markuu darsay: baahida cunto yarida eek a taagan dalka

Markuu ogaaday: Tamar yaraanta beeralayda soomaaliland

Markuu ogaaday: baahida cagaf –cagafyada ee xiliga qodaalka

Markuu arkay: jeedinta madaxda Wasaaradda Beeraha

Markuu ku qancay: baahida loo qabo aas – aasida qaybta cagaf-cagafyada Wasaaradda Beeraha.

Wuxuu Soo Saaray Xeerkan:

Qodobka ^{1aad:}

Waxaa la aas –aasay qaybta cagaf-cagafyada ee Wasaaradda Beeraha ,taas oo hoos imanaysa Wasaaradda Beeraha una shaqayn doonta madax banaan si loo gadho ama la abuurro mustaqabalka Walaaladii cagaf-cagafyada iyo Horumarinta Beeraha ee marka la soo gaabiyo loo yaqaano(ONAT).

Qodobka ^{2aad:}

Qaybtani waxay maamul ahaan hoos tagaysaa waaxda waxsoosaarka ee Wasaaradda Beeraha.

Waxayna ka qayb qaadan doontaa Kordhinta iyo kor u qaadida waxsoosaarka beeraha gaar ahaan cuntada la quuto (stable food), si loo gaadho isku filnaanshaha cuntada (food security).

Qodobka ^{3aad}:

Dakhliga

1. Waxaa loo baahan yahay oo laga maarmaan ah in ay qabtan cagaf-cagafyadu u shaqeyso sio madac banaan si ay ula soo baxdo dakhligooda, una kharash garayso si waafaqsan nidaam xisaabedka dalka.
2. Waa in dakhliga soo gala loo qaybiyaa sidan
 - a) Kharashka shaqada.
 - b) Dayactirka cagafyada.
 - c) Dhigaalka mustaqbalka.

Qodobka ^{4aad}:

Xilka iyo Waajibadka Qaybta Cagaf-cagafyada.

1. Waa in ay qodaan Mashaariicda beeraha ee dhulka dawladdu leedahay sida Tog-wajaale iyo meelaha kale ee ay dawlaaddu danaynayso xili qodaaleed kasta.
2. Waa in ay beeralayda ka caawiyaan helitaanka cagaf-cagafyada xiliga qodaalka.
3. Waa in ay beeralayda ugu adeegaan qiimo ka jaban ka shicibka.

4. Waa in ay ka hortagaan amma ka xakameeyaan kor u kaca qiimaha saacadaha.
5. Waa in ay wax weyn ka taraan baahida loo qabo cagafyada xiliga qodaalka.



ALLAH

MAHAD

LEH

Pro.Faarax Cilimi Maxamuud (Geedoole)

Wasiirka Wasaaradda Beeraha JSL

QAYBTA AFRAAD: **AMARADA & GO'AANADA MAAMUL**

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

MAXKAMADDA DEGMADDA HARGAYSA

MDH/DFL/16/2014

7/04/2014

Ku;- Idaacada Raadio Hargeysa

Ku;- Wargeysyada Madaxa banaan ee Hargeysa

Ku;- Garyaqaanka Guud Ee Qaranka J.S.L

OG;-Loofuliye;- ilma yuusuf warsame Rooble

OG;-Lagufuliye;-ilma Maxumed warsame Rooble

Ujeedo; naado iibin guri

Maxkamada Degamada Hargeysa

Markay Aragtay;- Galdacwadeedka Fulinta ah ee sumadiisu sare ku xusan tahay



Markay Aragtay;- Arjiga Codsiga fulinta ah ee u Taariikhaysan 10/2/2014 ee uu Qareenka loofuliyaashu Maxkamada u soo Gudbiyay

Markay Aragtay;- Xukunka Maxkamada Racfaanka G/Maroodi jeex ee sumadiisu tahay MRGH/DMRL/43/2011 KUNA TAARIIKHAYSAN 20/3/2012

Markay Aragtay ; - Xukunka, Maxkamada Sare ee sumadiisu tahay Ms/282/013 soona baxay 24/11/2013 ee lagu kala Xukumay in 9 guri ee dhaxalka ah in si isleeg looga qaybiyo ilma yuusuf warsame iyo Muxumed warsame

Markay;- u Cadaatay 9 guri marka loo Qaybiyo uu guri dhaxyaal yahay.

Asbaabta Sare ku xusan Darteed waxay Maxkamadu iibinaysaa Gurigan faa faahintiisu Hoos ku xusan tahay Maxkamada Dagmada Hargeysa

- Waxay iibinaysaa Guri kuyaala Dagmada Gacab libaax suuqa dhexe ee Hargeysa koonfurna kaga soo Jeeda Kaalinta ilma Cumar xaashi kuna jiro Tawfiiq Spare Sparts

jihooyinkiisuna kala yihiin waqooyi wado inta kale dhisme

- Maxkamadu waxay ogaysiinaysaa Cidii Danaynaysa inay gurigaa iibsato inay kala soo xidhiidhan kaalinta Sare ee Maxkamada Dagmada Hargeysa iyo Nambarada kala ah 0634100390. Iyo 0634009005 iyo 0634123675
- Iibinta Gurigan waxay Maxkamadu u cuskatay. 136.137.138.139.140 X.H.M
- Waxa la soo saaray naadadan Maanta 07/04/2014

Allaa Mahad leh

Sh. Xasan Qorane X. Cali

Garsooraha Maxkamada Dagmada Hargeysa

Kaaliye: - Maxamed Cali Cilmi

JAMHUURIYADDA  **SOMALILAND**

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

XIG/JSL/56/2014.


06/04/2014

Hargeysa.

KU: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaainta Guud ee Qaranka jamhuuriyadda Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha;-



Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay HILAAC TRADING EXPORT & IMPORT, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company Law.


Markuu arkay:- In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 (Company Act of Somaliland) saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan Tahay Shirkadda Magaceedu yahay HILAAC TRADING EXPORT&IMPORT, Astaanteeduna tahay:-

(Jeegan) shaqadeeduna tahay soo dejinta iyo
dhoofinta badeecadaha (Expor and
Import) xarunteeduna tahay Magaalada Hargeysa,
laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay
06/04/2014



Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

XIG/JSL/55/2014.

13/04/2014

Hargeysa.

KU: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka
jamhuuriyadda Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan
Gelinta Shirkadaha;-

Markuu arkay:- Qodobadda Ilaad ee Xeer
Shirkadaha, kaas oo awood u
Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta

Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay HORN TOUCH ENTERPRISE, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company Law.

Markuu arkay:- In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 (Company Act of Somaliland) saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan Tahay Shirkadda Magaceedu yahay HORN TOUCH ENTERPRISE,, Astaanteeduna tahay(goobo ay ku dhex qoran tahay magaca shirkada oo la soo gaabiyey) shaqadeeduna tahay soo dejinta alaabooyinka (Importer Goods)xarunteeduna tahay Magaalada Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 13/04/2014

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka



JAMHUURIYADDA SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

XIG/JSL/60/2014.

13/04/2014

Hargeysa.

KU: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka jamhuuriyadda Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha;-

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay HAYA LIMITED, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company Law.

Markuu arkay:- In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 (Company Act of Somaliland) saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan Tahay Shirkadda Magaceedu yahay **HAYA LIMITED**, Astaanteeduna tahay(Goobo Afar Gees) shaqadeeduna tahayAdeeg(It Service)xarunteeduna tahay Magaalada Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 13/04/2014

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

XIG/JSL/61/2014.

13/04/2014

KU: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed



Xafiiska Xeer Ilaainta Guud ee Qaranka jamhuuriyadda Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha;-

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay MUUQAAL TECHNOLOGY GENERAL TRADING COM, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company Law.

Markuu arkay:- In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 (Company Act of Somaliland) saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan Tahay Shirkadda Magaceedu yahay MUUQAAL TECHNOLOGY GENERAL TRADING CO, Astaanteeduna tahay(Afar Gees ay ku dhax qorantahay Magaca Shirkaddu) shaqadeeduna tahay soo dejinta alaabooyinka(General Trading)xarunteeduna tahay Magaalada Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 13/04/2014

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

XIG/JSL/57/2014.

13/04/2014


Hargeysa.

KU: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaainta Guud ee Qaranka jamhuuriyadda Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha;-

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.



Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay FORCIER CONSULTENCY, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company Law.

Markuu arkay:- In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 (Company Act of Somaliland) saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan Tahay Shirkadda Magaceedu yahay FORCIER CONSULTENCY, Astaanteeduna tahay(**Sadex afar gees oo isgalaaya**) shaqadeeduna tahay la talin iyo gadiidsiin(**Consultancy and logistcsb**)xarunteeduna tahay Magaalada Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 13/04/2014

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka



JAMHUURIYADDA  **SOMALILAND**

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

XIG/JSL/62/2014.

20/04/2014

Hargeysa.

KU: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka jamhuuriyadda Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha;-

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay TURKISH AFRICA TRADE(TAT), oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company Law.

Markuu arkay:- In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 (Company Act of Somaliland) saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan Tahay Shirkadda Magaceedu yahay **TURKISH AFRICATRADE(TAT)**, Astaanteeduna tahay(**Calaamad Muujinaysa xidhiidhka ka dhexeeyaTurkiga iyo S/land**) shaqadeeduna tahay soo dejinta badeecadaha(**Import**),xarunteeduna tahay Magaalada Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 20/04/2014

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA  **SOMALILAND**

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/64/2014.

20/04/2014

Hargeysa.

KU: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeedo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaainta Guud ee Qaranka jamhuuriyadda Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha;-

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay GOOGAA CIGALEE COMPONY, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company Law.

Markuu arkay:- In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 (Company Act of Somaliland) saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan Tahay Shirkadda Magaceedu yahay GOOGAA CIGALEE COMPONY, Astaanteeduna (tahay **Laba Goobo oo isku dhex jira**) shaqadeeduna tahay Tahay Ganacsiga Guud (General Trading) xarunteeduna tahay Magaalada Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 20/04/2014

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

XIG/JSL/63/2014.

20/04/2014


Hargeysa.

KU: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeedo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka jamhuuriyadda Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha;-

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.



Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay DOOLLAR STORES COMPONY, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company Law.

Markuu arkay:- In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 (Company Act of Somaliland) saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan Tahay Shirkadda Magaceedu yahay DOOLLAR STORES COMPONY, Astaanteeduna tahay(**Calaamad Saddex gees ah oo ay ku dhex qorantahay magaca Shirkadu**) shaqadeeduna tahay Tahay soo iyo dhoofinta(Import and Export) xarunteeduna tahay Magaalada Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 20/04/2014

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka



JAMHUURIYADDA  **SOMALILAND**

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

XIG/JSL/65/2014.

22/04/2014

Hargeysa.

KU: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeedo:-Caddeyn Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka jamhuuriyadda Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha dalka (**sole proprietorship**);-

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Ogolaanshaha Wasaaradda Ganacsiga JSL ee WGM-AG-PCA-56/014.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda ku magacaaban
MADHEY LIMITED



Wuxuu Caddynayaa .

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan Tahay Shirkadda Magaceedu yahay **MADHEEY LIMITED**, shaqadeeduna tahay Tahay soo dejinta Allaabta (Import) xarunteeduna tahay Magaalada Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 22/04/2014

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

XIG/JSL/66/2014.


22/04/2014

Hargeysa.

KU: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeedo:-Caddeyn Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaainta Guud ee Qaranka jamhuuriyadda Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha dalka (**Firms**);-



Markuu arkay:- Qodobadda 502aad ee Xeerka Madaniga.

Markuu arkay :- Xeerka Shirkad ku magacaaban Gate Way Law Firm.

Markuu arkay: - Saxeexa Saamiliyeeda Shirkaddu ay saxeexeen.

Wuxuu Caddynayaa .

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan Tahay Shirkadda ku Magacaaban GATE WAY LAW FIRM, shaqadeeduna tahay adeega Sharciga (Legal Firm), xarunteeduna tahay Magaalada Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 22/04/2014

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

QAYBTA SHANAAD:

OGEYSIISYADA



Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Qaranka

Ujeedo: Ogeysiis Faafinta Rasmiga ah:

Waxa Qaybta Faafinta Rasmiga ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Qaranku Ogeysiinayaa Dhamaan laamaha dawlada ee kala duwan in Buuga Faafinta Rasmiga ah uu yahay jaraa'id sharci oo bile ah, isla markaana wixii kusoo baxaa ay noqonayaan dhaqangal.

Sidaas darteed, waxaan ogeysiinaynaa in laamaha Dawladu ay ku baahin karaan Xeernidaamiyayaasha, Amarada, Go'aanada Maamul iyo Ogeysiisyada intaba, iyadoo uu xafiiska faafinta Rasmigu ku baahindoono dhamaan gobolada iyo degmooyinka Dalka.